



**Komishanka
Doorashooyinka
Qaranka JSL**
National Electoral Commission

**XEERKA HAB-DHAQANKA IYO ANSHAXA SAXAAFADDA
XEER LR. 03/2024**

EE

**DOORASHOoyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka
Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran ee
NOVEMBER 13, 2024.**

OCTOBER 27, 2024

[Handwritten signatures]

©NEC

CALL CENTER
318




info@slnec.com
www.slnec.com



26 June District,
Hargeisa Somaliland

TUSMADA XEERKA

| | |
|--|----|
| QAYBTA KOWAAD..... | 3 |
| Qodobka 1^{aad} | 3 |
| Magaca Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa..... | 3 |
| Qodobka 2^{aad} | 3 |
| Erey-bixinta..... | 3 |
| Qodobka 3^{aad} | 4 |
| Xadka adeegsiga Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda..... | 4 |
| Qodobka 4^{aad} | 5 |
| Ujeeddada Xeerkan Hab-dhaqan..... | 5 |
| Qodobka 5^{aad} | 5 |
| Mabaadii'da Guud..... | 5 |
| QAYBTA LABAAD | 5 |
| Qodobka 6^{aad} | 5 |
| Masuuliyada Saaran Warbaahinta/Saxaafadda Muddada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran..... | 5 |
| Qodobka 7^{aad} | 9 |
| Xuquuqda Warbaahinta/Saxaafadda Muddada Doorashooyinka..... | 9 |
| Qodobka 8^{aad} | 10 |
| Warbaahinta Dawlada, iyo Masuuliyada Dawlada ka saaran Warbaahinta Madaxabanaan..... | 10 |
| Qodobka 9^{aad} | 11 |
| Masuuliyada Xisbiyada Qaranka iyo Ururrada Siyaasadda..... | 11 |
| Qodobka 10^{aad} | 11 |
| Masuuliyada Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL..... | 11 |
| Qodobka 11^{aad} | 11 |
| Hay'adaha iyo Dadka Baraha Bulshada isticmaala ee Madaxabanaan..... | 11 |
| QAYBTA SADEXAAD | 11 |
| Qodobka 12^{aad} | 12 |
| Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda..... | 12 |
| Qodobka 13^{aad} | 12 |
| Tirada Xubnaha Guddida..... | 12 |
| Qodobka 14^{aad} | 12 |



| | |
|---|----|
| Shaqada Guddida | 12 |
| Qodobka 15^{aad} | 13 |
| Shuruudaha Xubnaha Guddida | 13 |
| Qodobka 16^{aad} | 14 |
| Magacaabida Guddida | 14 |
| Qodobka 17^{aad} | 14 |
| Kulamada Guddida | 14 |
| Qodobka 18^{aad} | 15 |
| Wadashaqeynta Komishanka iyo Guddida | 15 |
| Qodobka 19^{aad} | 15 |
| Wadashaqeynta Guddida, Xisbiyada, Ururrada iyo Musharaxiinta | 15 |
| Qodobka 20^{aad} | 15 |
| Reebanaan | 15 |
| Qodobka 21^{aad} | 15 |
| Luminta iyo buuxinta Xubinimada Guddida | 15 |
| Qodobka 22^{aad} | 15 |
| Mudada hawlgalka Guddida | 15 |
| QAYBTA AFRAAD | 16 |
| Qodobka 23^{aad} | 16 |
| Fasiraada Xeerka | 16 |
| Qodobka 24^{aad} | 16 |
| Tallaabooyinka Laga Qaadayo Cidda Xeerka Hab-dhaqanka Iyo Anshaxa Jebisa/Ku xadgudubta .. | 16 |
| Qodobka 25^{aad} | 16 |
| Wax-ka-bedel | 16 |
| Qodobka 26^{aad} | 16 |
| Dhaqangalka | 16 |
| Qodobka 27^{aad} | 17 |
| Awoodda Saxeexa | 17 |



QAYBTA KOWAAD

Oodobka 1^{aad}

Magaca Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda** ee Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran ee **Xeer Lr. 03/2024**.

Oodobka 2^{aad}

Erey-bixinta

Komishanka: - Waxaa loola jeeda Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ) oo u xilsaaran maamulida iyo ka garsooridda arrimaha doorashooyinka.

Xeerka hab-dhaqanka: Waxaa loola jeedaa Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda ee mudadda Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran.

Hab-dhaqan: Waxaa loola jeedaa hab-dhaqanka looga baahanyahay Saxaafadda Madaxbanaan iyo ta dawliga ah mudada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran, lana xidhiidha arrimaha doorashooyinka oo dhan.

Xisbiyada Qaranka: - Waxaa loola jeedaa saddexda Xisbi Qaran ee JSL, kuwaasi oo u tartamaya doorashada Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaranka.

Ururr Siyaasadeed: - Waxaa loola jeeda Ururrada Siyaasadda Guddida Diiwaangalinta iyo Ansixinta Axsaabta Qaranku u soo gudbiyeen Komishanka, kana qaybgalaya doorashada Xisbiyada Qaran.

Musharax : Waxaa loola jeedaa Musharaxiinta u taagan tartanka jagada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL ee u taagan doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL ee 2024, kaas oo uu soo sharaxay Xisbi gaar ah, isla markaana ay ogolaadeen KDQ Musharaxnimadiisa.

Doorasho: - Waxaa loola jeedaa Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran ee KDQ u cayimay November 13, 2024.

Guddi: - waxaa loola jeedaa Guddida Ilaalinta Xeerka hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda.

Natiijada doorashada: - waxaa loola jeeda natiijooyinka doorashada ee Komishanku ka soo saaro Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran.

Warbaahinta/Saxaafadda Dawlada: waxaa loola jeedaa wargeysyada, muuqaal-baahiyayaasha, maqal baahiyayaasha, mareego (Websites), bogaga ay ku leeyihiin baraha bulshada iyo nooc kasta oo baahineed oo ay dawladdu maamusho.



Warbaahinta/Saxaafadda Madaxbanaan: - waxaa loola jeedaa warbaahinta/saxaafadda aanay dawladu maamulin ee ka madaxbanaan ha ahaadeen muuq-baahiye, wargeysyo, mareego (Websites), baro bulsho iwm.

Baraha Bulshada: - waxaa loola jeedaa goobaha ama aalladaha internet-ka ee dadka u suurto geliya inay ku wada xidhiidhaan, ku wadaagaan macluumaad, fikrado, sawirro, muuqaallo, iyo warar kala duwan. waxaana ka mid ah Facebook, Twitter (X), Instagram, LinkedIn, iyo TikTok.

Wararka been abuurka ah: - waxaa loola jeedaa warbixino ama warar la faafiyo oo aan sax ahayn lana xidhiidha arrimaha doorashooyinka, kuwaas oo loogu talagalay in lagu qaldo laguna majara habaabiyo dadweynaha, sida in la abuuru jahawareer, la saameeyo ra'yiga dadweynaha, ama la carqaladeeyo hawlaha doorashooyinka si loo gaaro dano gaar ah.

Tafatire/Tafatireyaal: - waxaa loola jeedaa dadka/qofka mas'uulka ka ah dib-u-eegista, saxitaanka, iyo hagaajinta qoraallada, maqaallada, ama warbixinada ka hor intaan la daabicin ama la baahin. Tafatiruhu wuxuu hubiyaa in qoraalka uu yahay mid sax ah, si wanaagsan loo dhigay, iyo in uu waafaqsan yahay heerarka ama siyaasaddaha daabacadda iyo war-tebinta.

Ololaha doorashada: waxa loola jeedaa hawgalka dhaca muddada sharcigu jideeyey ee ka horraysa maalinta doorashada ee ay Ururrada, Xisbiyada, iyo Musharaxiintu kusoo bandhigaan barnaamijkooda siyaasadeed iyo mabaadii'dooda. Hawlgalkaas waxaa ku jiri kara kulanno, isu soo baxyo (rallies), waraysiyo, doodo IWM, iyadda oo ay ujeeddadu tahay inay hantaan/kasbadaan cod-bixiyayaasha.


Dadka Baraha Bulshada Isticmaala: waxaa looga jeeda xeerkan dadka baraha bulshada u isticmaala warbaahin/wartebin ahaan si ay ugu faafiyaan arrimaha la xidhiidha doorashooyinka ha ahaadeen saxafiyiin madaxbanaan, kuwo dawladeed, qoraayada bogaga (bloggers), falanqeyayaal siyaasadeed (Political Commentators) Garyaqaano, iwm.

Qodobka 3^{aad}

Xadka adeegsiga Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda

Xeer Anshaxeedkan ; -

1. Waxa lagu dhaqi doonaa dhammaan saxaafadda gaarka ah iyo ta dawladdu maamusho muddada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran ee 2024.
2. Xeer Anshaxeedkani Waxa uu khuseeyaa muddada ka horeysa doorashada, doorashada dhexdeeda iyo mudada ka danbaysa doorashooyinka.
3. Waxa uu xooga saarayaa isla markaana dhawrayaa xaqa shakhsigu u leeyahay in uu helo xog sugan oo la xidhiidha arrimaha doorashooyinka 2024.
4. waxa uu faah-faahinayaa xuquuqda ay leeyihiin saxaafadda madaxbanaan iyo tan dawlaga ahi, iyo mas'uuliyada saaran muddada doorashooyinka.



M.Y.

Oodobka 4^{aad}

Ujeeddada Xeerkan Hab-dhaqan

Ujeeddada Xeerkan hab-dhaqan waa'-

1. In uu horseedo is-fahan dhex mara Komishanka, Xukuumadda, iyo Saxaafadda si mid kastaa u aqoonsado doorka uu ku leeyahay warbaahinta muddada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha, iyo Xisbiyada Qaran kaas oo horseedaya horumarinta hannaanka Dimuqraadiyadeed ee dalka.
2. Dejinta mabaa'diida guud ee ka caawinaysa saxafiyiinta in ay raacaan heerarka ugu sareeya dhinaca xirfada saxaafadda iyo gudashada xilkooda muddada doorashooyinka, taas oo ah in ay bulshada siiyaan xog sugan si ay uga qayb-galaan doorashooyinka.
3. Inuu abuuru **Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda** si loo dhaqan-galiyo Xeerkan Hab-dhaqan.

Oodobka 5^{aad}

Mabaadii'da Guud

1. Baahinta saxaafadda wanaagsan waxa haga mihnad aqoonsan ama garawsan ahmiyadda muhiimka ah ee ay bulshada u hayso iyada oo xaq bulshadu ugu leedahay in ay hesho xog sugan oo ka tarjumaysa xaqiiqda oo sax ah si ay u qaadato go'aan xog-ogaalnimu ku dhisan.
2. Saxaafadda wanaagsani waa mid dheeli-tiran, iskuna miisaanta afkaarta iska soo horjeedda si ay u dheellitirto doodaha Xisbiyada, Ururrada iyo Shakhsiyaadka Bulshada, Siyaasiyiinta, Musharaxiinta IWM. Habkaasi waxa uu dhawrayaa xaqa uu qofku u leeyahay in uu helo xog run ah.
3. Baahinta saxaafadda wanaagsani waxa ay masuuliyad iska saartaa in ay ka dheeraato in ay bulshada fidno kala dhex-dhigto, mana tebiso war been abuur ah, ama nacayb ka buuxo ama hadal deel-qaaf ah.


QAYBTA LABAAD

Oodobka 6^{aad}

Masuuliyada Saaran Warbaahinta/Saxaafadda Muddada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran.

Warbaahinta waxaa saaran Masuuliyadaha hoos ku xusan Muddada Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran.

1. Saxaafadda waxa laga doonayaa in ay ula dhaqanto dhamaan xogaha Musharaxiinta Xisbiyada iyo Ururrada Siyaasadda dhexdhexaadnimu
2. Haddii barnaamij tebintiisa cidii iibsato, bulshadu waxa ay xaq u leedahay in ay ogaato aqoonsiga qofka, Xisbiga, Ururka, Musharaxa, ama masuulka bixiyay lacagta barnaamijka.

 5

3. Saxaafaddu waa in ay u dhaqantaa si masuuliyadi ku dheehan tahay iyaga oo tebinaya xaqiiqda isla markaana ka dhawrsanaya in ay qaataan war marin habaabin samaynaya, kuwaas oo ay ku jiraan astaamo/sumad cid u gaar ah, sawiro, ama haddalo deel-qaaf ah, faalo aan sax ahayn oo ka dhan ah shakhsiyaad, Urur, Xisbi ama Musharax ama Musharaxiin.
4. Saxafiyiinta iyo sawir qaadayaashu waa in ay raacaan shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda sawirka iyo hab-raacyadooda. Isla markaana waxba ka bedelin sawirada iyo muuqaalada si ay bulshada u marin habaabiyaan.
5. Xogta aan saxda ahayn, marin habaabinta ah, ama qaladka ahi waxa ay u baahan yihiin in la aqoonsado. Sixitaanka xogta la baahiyay/daabacay waa in loo sameeyaa sida ugu dhakhsaha badan si looga ilaaliyo bulshadda in ay gaadhaan warbixin qaldani.
6. Waa in fursad caddaalad ah la siiyaa jawaab celinta xogta qaldan ee ay bixinayaan shakhsiyaad ama Xisbiyo, Ururro, ama Musharaxiin marka si macquula looga dalbado, waana in la siiyaa waqti iyo mug (space) ku filan. Mar kasta oo hay'ad war-baahineed cid dhibane ahi ka cabato, hay'ada war-baahineedna waa in ay garawsataa.
7. Saxaafaddu waa in ay ka dheeraataa baahinta xog ku xad-gudbaysa dhawrsanaanta Diinta Islaamka.
8. Saxaafaddu waa in ay adeegsataa taxadar badan marka ay tebinayso kiisaska ku jira maxkamadaha ee la xidhiidha arrimaha doorashooyinka, ee aan wali la go'aamin, si ay uga taxadaraan in ay dhaawacaan geeddi-socodka dhagaysiga maxkamadda iyo arrimaha doorashooyinka. Balse taasi looma tafsiiri doono in ay xakamaynayso xaqa ay saxaafaddu u leedahay in ay ka warbixiyaan dhagaysiga dacwadaha maxkamadaha ka socda marxalahada ay marayaan.
9. Arrimaha ku lugta leh dhibaato iyo tacsii qof soo gaadhay oo la xidhiidha arrimaha doorashooyinka, waa in waydiimaha iyo habka loo waraysanayaa noqdaa mid aanay ka dhalanaynin dhibaato cusub oo saamayn ku yeelata habsami usocodka doorashooyinka balse ah mid naxariisi ku jirto oo dhibta la dareemi karta dhibanayaasha.
10. Warbaahinta qaybaheeda kala duduwan, iyo Wariyayaashu ha ahaadeen kuwa baraha bulshada isticmaala iyo kuwa kaleba e, waa in aanay isku dayin in ay wararka la xidhiidha arrimaha doorashooyinka ku helaan iyaga oo isticmaalaya hab sir ah sida kamaradaha qarsoon ama qalabka wax lagu dhagaysto ama lagu duubo.

Xogta/Wararka Natijada Doorashada

11. Saxafiyiinta waxa uu waajib ka saaran yahay in ay warka ku saabsan geedi-socodka doorashada iyo ku dhawaaqista doorashada ay qaataan oo kaliya ta ka soo baxda Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL. Waana in aanay ka hor dhicin natijada doorashada isla markaana aanay ka soo xigan natijadda cid kale oon ahayn Komishanka Doorashooyinka Qaranka, taas oo abuuri karta xasilooni darro iyo kalsooni darro.
12. Saxaafaddu waa in ay ka taxadartaa in ay baahiso xog dhaawacaysa habsami-usocodka doorashooyinka, iyo amniga qaranka. Iyada oo taas laga duulayo, saxaafadu waa in aanay baahin natijoooyinka aan rasmiga ahayn, mala-awaalka ah, ama been abuurka ah, si ay u marin habaabiyaan bulshada.

[Handwritten signature]

[Handwritten signature]

[Handwritten signature]

13. Warbaahinta qaybaheeda kala duduwan iyo Saxafiyiintoodu waa in aanay u dabaal-degin natiijada doorashooyinka. Waana in ay u tabiyaan hab xaqiiqo ku dhisan, iyaga oo aan waxna ku darayn, waxna ka dhimayn.
14. Si loola dagaalamo wararka been abuurka ah, natiijada doorashada waa in la soo saaraa waqti ku haboon loona siiyaa si siman dhamaan saxafiyiinta si looga hortago natiijooyinka mala-awaalka ah.
15. Si looga taxadiro wararka ku tiri-kuteenka ah ee ku saabsan natiijooyinka doorashooyinka, iyada oo la raacayo Shuruucda Somaliland ee Doorashooyinka, saxaafadda waa in la siiyaa natiijada hordhaca ah, ee heer qaran oo ay siiyaan Komishanka Doorashooyinku.

Wacyigelinta Doorashada

16. Saxaafaddu waa in ay ka qayb gashaa nidaamka wacyigelinta bulshada si ay cod-bixiyayaashu u helaan go'aan xog-ogaalnimu ku dhisan oo ay ugu codeeyaan Musharaxiinta, Xisbiga, ama Ururka ay rabaan.
17. Wacyigelintu waa inay noqoto mid si siman loo siiyo cod-bixiyayaasha iyada oo aan loo eegayn Xisbi, Urur ama Musharaxa ay taageersanyihiin.

Dhawrista Noloshu Gaarka ah

18. Qof kastaaba waxa uu xaq u leeyahay in loo dhawro noloshiisa gaarka ah iyo noloshu goyskiisa ee gaarka ah, gurigiisa, caafimaadkiisa iyo isgaadhsiintiisa. Baahintu waa in ay sababayn kartaa ku-xadgudubka lagu sameeyay noloshu gaarka ah ee qofka gaar ahaan hogaamiyayaasha Xisbiyada, Ururrada, Musharaxiinta, iyo hawl-wadeenada Komishanka iyaga oon ogolaansho laga helin.
19. Saxaafaddu waa in aanay qaybin xog kasta oo dhaawacaysa sirta gaarka ah ee dadka, sumcaddooda, ama sharaftooda.

Baahinta Wararka dadka Baahiyaha Gaarka ah leh

20. Warbaahinta/Saxafiyiinta waxa ay masuuliyadi ka saaran tahay in ay baahiyaan baahiyaadka gaarka ah ee la xidhiidha arrimaha doorashooyinka ee dumarka, dadka laxaadka la'aan, da' yarta iyo dadka la hayb-sooco iyo in ay arrintaasi u soo bandhigaan hab dheeli tiran oo taxadar leh.
21. Saxaafaddu waa in ay ka fogaataa in qofka loo aaneeyo qabiilkiisa, jinsigiisa ama xanuun maskaxiyah ah oo kale ama xaalad naafanimu.

Masuuliyada Tafatirayaasha

22. Waxa masuuliyadi ka saaran tahay tafatirayaasha iyo baahiyayaasha in ay u adeegsadaan Xeerka waxyaabaha la tafatirayo ha daabacnaadeen ama ha noqdeen qaar laga heli karo mareegaha iyo mida la baahiyaba. Waa in ay ka taxadaraan oo ay hubiyaan in si adag ay u dhawraan hawl-wadeenadooda saxaafadda wax ku daabaca, oo ay ku jiraan kuwa aan saxafiyiinta ahayni.

Warbaahinta Caalamiga ah

23. Warbaahinta caalamiga ah ee ka hawl-gelaya Somaliland waxa ay leedahay baahin balaadhan oo muhiim ah, iyo dhagaystayaal, waxayna saamayn kartaa cod-bixiyayaasha. Sidaas awgeed, waa in lagu dhiirigeliyaa in ay uga warbixiyaan arrimaha doorashooyinka Somaliland hab qoto dheer leh, iyaga oo tixgelinaya xeerarkooda anshaxa ee ku saabsan tebinta doorashooyinka iyo xeerkan anshaxa saxaafadda ee Somaliland.
24. Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxa lagu dhiirigelinayaa in ay la socdaan tebinta wararka la xidhiidha arrimaha doorashooyinka ee ay tabinayaan warbaahinta caalamiga ahi. Iyo in ay sameeyaan hab lagula shaqayn karo oo lagu xalliyo cabashooyinka ka yimaada.

Warbaahintu, iyaga oo maanka ku haya, ayidsanna mas'uuliyadaha saaran ee ku xusan xaga sare, waxa ay balan qaadaysaa:

1. In ay si hufan u baahiso warbixinaha la xidhiidha wacyigelinta, war-saxaafadeedyada, iyo natiijooyinka doorashada.
2. In ay tabiso ololaha doorashooyinka, una tebiso hab cadaalad ah, dheeli tiran isla markaana dhexdhexaad ah, kana madhan buunbuunin iyo u xaglin cid gaar ah.
3. In ay hubiso in warku dheeli-tirnaado noqdo dhexdhexaad isla markaana ku salaysnaado xaqiiqda.
4. In ay ka digtoonaadaan in ay siiyaan tabin xad-dhaaf ah Xisbiyada, Ururrada ama Musharaxiinta qaarkood.
5. In a anay bixin farriimo doorasho oo dhinac u xaglinaya muddada doorashada, gaar ahaana maalinta ka horaysa cod-bixinta, si loogu ogolaado cod-bixiyayaashu in ay go'aankooda ku gaadhaan si xor ah iyaga oon cadaadis saarnayn ama aan dareemayn nooc kasta oo uu yahay.
6. Inta suurto-gal ah, in ay si toos ah usoo tebiyaan aragtida Musharaxiinta, Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasiga ah iyaga oo hadalkooda sidiisa usoo daynaya, oo aanay soo dayn iyaga oo la jar-jaray, si loo marin habaabiyo bulshadda ama iyaga oo qof kale sharaxayo, haddii aanu hadalku xanbaarsanayn deel-qaaf, nacayb, iyo kicin dadweyne, oo wax u dhimi karta geedi-socodka doorashooyinka, amniga iyo xasiloona dalka.
7. In ay damaanad qaadaan xaqa Musharaxa Xisbiga ama Ururka siyaasiga ahi u leeyahay in uu si deg-deg ah uga jawaab-celiyo xog, ama war laga baahiyay, haddii sidaa loo baahdo.
8. In ay isticmaalaan erayo dhexdhexaad ah oo aan dhinacna u xaglinayn, tabinta warbixinaha doorashaduna noqdaan qaar aan ku dhisnayn caadifad iyo laab-la-kac kana taxadiro erayada farsammo iyo tira-koobka isla markaana hubiyo in ciwaanka warku ka tarjumayo xaqiiqada iyo xogta gudaha ee warku xanbaarsan yahay oo aanu ahaan wax is khilaafsan.
9. In ay ka dheeraadaan in uu kiciyo/huriyo dareenka caadifadaysan ee arrimaha lagu muransan yahay isaga oo arrimahaasi si caadifadaysan u gudbinaya taas oo dhib ka dhalan karto.
10. In la kala saaro aragtida iyo fasiraada qofka, kuna koobo aragtida iyo faaladda tafatiraha qaybta tafatiraha iyo bogga rayiga iyo barnaamijyadda.

11. In uu wixii xayaysiis ah si cad u muujiyo isla markaana aanu ku dhex darin warka, hubiyona in baahinta warku, ama xogtu waafaqsan tahay Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa ee Saxaafadda.
12. Fullinta waajibka ka saaran in ay isbaraan qofka ama cida ay war ka baahinayaan, daacadna ka noqdaan kana caddaalad sameeyaan habka warka ay kaga helayaan, u tabinayaan iyo hannaanka ay ugusoo gudbinayaan dadweynaha.
13. Si looga baaqsado wararka been abuurka ah, in illaha warka doorashooyinku ku koobnaado illaha rasmiga ah ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.
14. In aanay ka qaadan wax saamaynaya (incentives) shaqadooda Xisbi, Urur, qof siyaasi ah iyo Musharaxtoona.
15. In qadarka kharasheed ee laga qaadayo wararka, iyo barnaamijyada Xisbiyada, Ururrada, Musharaxiinta, iyo siyaasiyiinta kaleba aanay kala duwin oo midna aanay qiime jaban siin (qiime dhimis) midna u diidin, midna aanay wakhti badan sii dayn, midna in yar, ee ay wakhti isku mid ah siiyaan.
16. Inay ay ka reebantahay gabi ahaanba in ay qaado ra'yi bulsho oo aanay lahayn xirfadii iyo awoodii aqooneed ee habka loo Ururiyo rayiga bulshada, isla markaana aanu shacabku u bislayn.
17. In aanay soo gudbin shirarka jaaraa'id ee shaqsi lagu aflagaadaynayo ee bulshada dhexdeeda ka abuuraya nacayb sida qabyaalada, cayda shakhsiga ah, iyo nabadgelyo daro taasi oo xidhiidh la leh arrimaha doorashooyinka.
18. In aanay gudbin wararka cidi u yeedhiso ama dano dhaqaale ha dhaafsadaan ama dan qabiil ha dhaafsadaane, maadaama waajib ay tahay in warka saxafigu gudbinayaa noqdo mid si xor ah oo madaxbanaan uu ku helay kuna dhisan xaqiiq isla markaana waafaqsan anshax wanaagsan iyo akhlaaqda suuban, ee mihnadda saxaafadda laga doonayo,
19. In wararka ay baahinayaan noqdaan qaar bulshada wax taraya oo aan dhibi ku jirin.
20. In warbaahinta iyo saxafiyiinteedu si joogto ah ula socoto bogaga kala duwan ee ay ku leeyadahay baraha bulshada si looga hortago baahinta fariimaha nacayb ka ah iyo kuwa been abuurka ah.
21. In ay door muhiim ah ka qaataan yaraynta khilaafaadka (conflict de-escalation) iyo adkaynta nabada xilliga lagu gudo jiro doorashooyinka.

Qodobka 7aad

Xuquuqda Warbaahinta/Saxaafadda Muddada Doorashooyinka

1. Saxaafaddu waa in ay fursad u hesho xogta Arrimaha la xidhiidha doorashooyinka.
2. Dhammaan saxaafadda qaybaheeda kala duwan waa in ay galaangal macquul ah u yeelan karaan habraaca doorashooyinka iyo ka-qayb galayaasheeda, kuwaas oo ay ku jiraan maamulayaasha doorashada, goobaha doorashada, Musharaxiinta iyo cod-bixiyayaasha.
3. Saxaafaddu waa in ay awooddaa in ay warbixiinteeda iyo daraasadeeda ku samayso deegaan ka bad-qaba cabsi-gelin, nacayb iyo aargoosi.
4. Saxaafaddu waa in ay xor u noqotaa in ay uga warbixiso dhacdooyinka ololaha doorashooyinka hab ku dhisan xaqiiqo iyo sugnaansho.



5. Saxaafaddu waxa ay xor u tahay in ay abaabusho barnaamijyada iyo doodaha la xidhiidha doorashooyinka ee aan waxba u dhimayn nabadgelyada iyo habsami usocodka doorashooyinka.
6. Saxaafaddu waa in ay awoodaa in ay si xor ah dalka oo dhan u tagi karto si ay ula socoto ololaha doorashooyinka ee Xisbiyadda Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiinta una eegto sida ololuhu uga socdo.
7. Dhamaan saxaafadda waa in loola dhaqmaa si isku mid ah, ha noqoto saxaafadda gaarka loo leeyahay ama ta dawladda. Tani waxa ay khuseysaa galaan-galka ay u leeyihiin Xisbiyada, Ururrada Siyaasadda, Musharaxiinta, goobaha doorashada iyo xogta.
8. Maamulka dawladda, Xisbiyadda Qaran, Ururrada Siyaasadda, Musharaxiinta iyo ciddii kale ee ay khuseysaa waa in ay ka waantoobaan in ay faro-geliyaan arrimaha saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee saxaafadda iyaga oo ujeedadoodu tahay in ay saameeyaan doorashooyinka..

Oodobka 8^{aad}

Warbaahinta Dawlada, iyo Masuuliyada Dawlada ka saaran Warbaahinta Madaxabanaan

Warbaahinta Dawladda

1. Xisbiyadda Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiintu waa u siman yihiin, warbaahinta dawladda sida cod-baahiyaha Raadyow Hargaysa, muuq-baahiyaha TVga Qaranka, iyo wargeysyada dawladu gacanta ku hayso. Waana in dawladu ay siiso bed, iyo waqti is-leeg ololaha Xisbiyadda iyo Ururrada Siyaasadda.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranku isaga oo arrintaasi kala tashanaya Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta, Xisbiyadda, iyo Ururrada waxa uu dajin doonaa shaxda muddaysan ee loo qoondeeyay sii deynta ololayaasha Xisbiyadda Qaranka iyo Ururrada Siyaasadda ee kaltanka Wararka iyo Barnaamijyadda, shaxdaasi waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Xeerkan Hab-dhaqanka.
3. Shaxda muddaysan ee loo qoondeeyay sii deynta ololayaasha Xisbiyadda Qaranka iyo Ururrada Siyaasadda, waa in la soo saaro wakhti ku haboon.


Masuuliyada Dawladda ka saaran Warbaahinta Madaxabanaan.

4. Dawlada iyo hay'adaheeda kala duwan waa inay hubiyaan badqabka saxafiyiinta xilliga lagu jiro doorashooyinka, loona cago juglaynin
5. Dawladu waa inay talaabo degdeg ah ka qaado haddii lagu xadgudbo saxafiyiinta iyo warbaahinta qaybaheeda kala duwanba.
6. Dawladu waa inay tixgeliso xaqa ra'yi dhiibashada iyo dhaqdhaqaaqa ee saxafiyiinta inta lagu gudo jiro doorashada, waana in aanay la iman ficilo xaddidaya xuquuqaha sharcigu siiyay.









Qodobka 9aad

Masuuliyada Xisbiyada Qaranka iyo Ururrada Siyaasadda

1. Dhamaan Xisbiyada Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiintu waa inay ixtiramaan xorriyada warbaahinta/saxaafadda.
2. Xaqa saxafigu u leeyahay inuu helo war, tebiyona.
3. Dhamaan Xisbiyada Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiintu waa inaanay la iman ficilo keeni kara in warbaahintu ku xadgudubto xeer anshaxeedkan.
4. Warbaahinta ku xadgudubta xeer anshaxeedkan kaasi oo ay sababeen Xisbiyada Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiintu, waxa laga qaadayaa talaabo sharciga wafaaqsan.

Qodobka 10aad

Masuuliyada Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.

Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL waa inuu; -

1. Ixitiraamo xorriyada Warbaahinta oo ay ku jirto xaqa xoriyadeed ee uu leeyahay tafatirahoodu.
2. Ixtiraamo xaqa ra'yi dhiibashada ee Xisbiyada, Ururrada iyo Musharaxiinta.
3. Xaqa saxafigu u leeyahay inuu helo war, tebiyona.
4. KDQ waa inay dhex u ahaadaan warbaahinta iyaga oo aan tixgelin gaar ah siinayn qayb ka mid ah.
5. La wadaago warbaahinta arrimaha la xidhiidha doorashooyinka si ay u baahiyaan, taasi oo ka hortagaysa faafida wararka been abuurka ah ee la xiidhiidha arrimaha doorashooyinka.
6. Abuuro xafiis u gaar ah warbaahinta oo warbaahintu kala xidhiidho arrimaha iyaga khuseeya ee la xidhiidha doorashooyinka. Xafiiskan sidoo kale waa isku xidhaha Komishanka iyo warbaahinta noocyadeeda kala duduwan.

Qodobka 11aad

Hay'adaha iyo Dadka Baraha Bulshada isticmaala ee Madaxabanaan

Mudada ka horaysa, dhexdeeda iyo mudada ka danbaysa doorashooyinka, Qof wal ama hay'ad wal oo isticmaasha baraha bulshada si ay ugu faafiyaan warar la xidhiidha arrimaha doorashooyinka iyagoo u faafinaya hannaan la mid ah hannaanka warbaahineed, xeerkan hab-dhaqan wuu qabanayaa.

QAYBTA SADEXAAD



Qodobka 12^{aad}

Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda

Saxeexayaasha Xeerkan Hab-dhaqan/anshax waxa ay isku raaceen in la abuurdo Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda ee Muddada ololaha iyo Doorashooyinka Madaxweynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Xisbiyada Qaran.

Qodobka 13^{aad}

Tirada Xubnaha Guddida

Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadu waxa ay ka kooban tahay todobada (7) xubnood, oo ka kala iman doona:

- b. Laba wakiil oo ay soo magacaabaan Ururka Saxafiyiinta ee SOL JA.
- t. Laba wakiil oo uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigelinta.
- j. Hal wakiil oo ka socda Ururka Saxafiyiinta Dumarka ee WIJA.
- x. Laba xubnood oo uu Komishanku ka soo magacaabo qareenadda iyo aqoonyahanka dalka.

Qodobka 14^{aad}

Shaqada Guddida

1. Ujeedada Guddidu waa in ay kormeerto dhaqangalka Xeerkan Hab-dhaqan ee saxaafadda, si loo hubiyo fulintiisa loona gudbiyo bulshada iyo dhinacyadduba in ay raacaan.
2. Guddidu waxa ay u kuurgeli doonaan qaabka ay u shaqayso saxaafadda dawladda iyo mida gaarka loo leeyahay ba waqtiga doorashada, waxaana ay warbixinta gungaadhkooda siin doonaan Komishanka Doorashooyinka todobaad kasta hal mar, ama kolba sida loogu baahdo inta ay socoto doorashadu.
3. Guddidu waxa ay si maalinle ah ula socon doonaan barnaamijyadda laga sii daayo codbaahiyaha Raadyow Hargeysa, muqaal-baahiyaha TVga Qaranka iyo Wargeysyada dawladda maamusho si ay u hubiyaan in ay si dhexdhexaad ah, oo dheelitiran Ururrada iyo Xisbiyadduna u siman yihiin usoo dayaan barnaamijyadooda, waxaanay warbixintooda siin doonaan KDQ.
4. Guddidu waxa ay si joogto ah xog ku saabsan sida dhinacyadu ugu dhaqmeen Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa u siin doontaa Komishanka. Haddii xogta Komishanka Guddidu usoo gudbisay ay ka dhalanayso anshax marin, Komishanka ayaa qaadaya talabaada anshaxmarineed ee haboon iyada oo loo raacayo xeerarka ay khusayso.
5. Guddidu waxa ay yeelan doontaa xafiis ay hawshooda iyo kulamadooda ku qabsadaan, isla markaana u saamaxaya xil-gudashadooda. Komishanka ayaana go'aaminaya halka xafiiskoodu noqonayo.

6. Guddidu waxa ay tala-bixin ka gaysan doonaan habka loo suurtoogelin karo doodaha khuseeya arrimaha doorashooyinka iyo in si wanaagsan loo adeegsado Xeerka Saxaafadda, Xeerka hab-dhaqanka iyo Anshaxa iyo xeerarka kale ee dalka u yaala.
7. Guddidu waxa ay tala-bixin ka gaysan doonaan qaabka loo xakamaynayo warbaahinta Xisbiyadda iyo Ururrada u gaarka ah, sida bogooda internetka iyo warbaahintooda baraha bulshada (social media), muddada ololaha doorashada iyo ku-dhawaaqista natiijadda doorashada.
8. Guddidu waxa ay soo saari doontaa bulshadana usoo bandhigi doontaa warbixin todobaad leh ah, oo ku saabsan sida saxaafadu ugu dhaqantay Xeerkan hab-dhaqan muddada doorashooyinka, iyaga oo magac dhabi kara saxaafadda ama rugaha saxaafadeed ee ku gafa Xeerka Hab-dhaqanka.
9. Saxafiga ama rugta saxaafadeed ee ku gefa qodobada Xeerkan, waxa ay guddidu ka dalban doontaa in ay iskood u saxaan.
10. Cid kasta oo ku gefka Qodobadda Xeerkan Anshaxa, isna sixi wayda marka sidaa ay ka dalbato Guddidu waxay u gudbin doontaa Komishanka si talaabo anshaxmarineed oo sharciga waafaqsan looga qaado, iyadoo loo raaci doono Xeerka Saxaafadda (Xeer Lr. 27 /2004), Xeerarka doorashooyinka iyo xeerarka kale ee dhaqan galka ah.

Qodobka 15^{aad}

Shuruudaha Xubnaha Guddida

1. Waa inuu yahay/tahay muwaadin Somaliland u dhashay
2. Waa in aan da'diisu/da'deedu ka yarayn 30 sano.
3. Waa inuu leeyahay / leedahay aqoon heer jaamacadeed ugu yaraan ama waayo aragnimo maamul ama saxaafadeed oo u dhiganta 10 sanadood ugu yaraan.
4. Waa in uu yahay/tahay qof sumcad wanaagsan ku leh bulshada.
5. Waa in uu yahay/tahay qof leh go'aan qaadasho, karti, aqoon iyo waayo-aragnimo uu ku gudan karo mas'uuliyadda culus ee la saaray,
6. Waa inuu yahay/tahay qof hufan, danta guud ka fekera, oo waxtar qiimo leh ku soo kordhin kara Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.
7. Waa in aan dembi ciqaab ah oo maxkamad horteed kaga cadaadey ku dhicin shanti sano ee udanbaysay.
8. Waa inuu caafimaad ahaan gudan karaa xilka.
9. Xubnaha Guddidu waa in ay ku sifoobaan dhex-dhexaadnimo, daacadnimo, hufnaan, isla markaana waa in aanay xubin iyo taageere sinaba uga ahayn Xisbiyada iyo Ururrada tartamaya.
10. Xubnaha Guddidu waa in aanay noqon mulkiilayaasha rugaha saxaafadda, iyo tafatirayaashooda isla markaana waa in aanay xil ka haynin hay'adaha warbaahineed ee ay ka tirsan yihiin mid dawladeed iyo mid madax banaan ba.
11. Xubnaha Guddidu waxa ay noqon doonaan shakhsiyaad khibrad u leh hubinta in Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa la fuliyo, cabashooyinka la baadho, warbixinona la soo saaro.

Qodobka 16^{aad}

Magacaabida Guddida

1. Komishanku marka uu helo tirada xubnaha ku xusan qodobka 15^{aad} ee xeerkan isla markaana hubiyo in ay buuxiyeen shuruudaha u dejisan, waxa uu si rasmi ah u shaacin doonaa magacaabista **Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda.**
2. Haddii xubin Guddida loo magacaabay uu Komishanku ku qanci waayo, iyaga oo sababaynaya waxa uu ka dalban doonaa cidda soo magacowday in ay sida ugu dhakhsaha badan usoo bedelato, isla markaana waafaqdo shuruudaha u yaala.
1. Marka la magacaabo, Guddida, fadhigooda ugu horeeya waxa lagu dhaarin doonaa dhaarta ku xusan xeer 91/2023. Isla fadhigaa, waxa ay iska dhex dooran doonaan Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xog-haye. .
2. Fadhiga ugu horeeya ee Guddidu ku dooranayso Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xog-haye waxaa gudoominaya xubinta ugu da'da wayn marka laga reebo xubnaha sharaxan.
3. Xubinta shirka Gudoominaysaa cod malaha, haddii se codadka loogu codaynayo mid ka mid ah ama dhamaan Gudoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeenka iyo Xog-hayuhu isleekaadaan gudoomiyaha ayaa codkiisa ku kala saaraya.

Qodobka 17^{aad}

Kulamada Guddida

1. Guddidu waxa ay kulan yeelanaysaa todobaadkiiba laba jeer. Haddii arrimo degdeg ahi yimaadaan, Guddidu waxay codsan kartaa kulamo deg-deg ah.
2. Shirarka la xidhiidha arrimaha degdega ah waxaa codsan kara Guddida lafteeda, daneeyayaasha doorashooyinka, ama Komishanka Doorashooyinka Qaranka, hase ahaatee midba waa inuu midka kale ogaysiis ku siiyo maalinta iyo saacada kulanku dhacayo, iyo ujeedada kulanka.
3. Waa in la diyaariyo warbixinta shirkasta oo dhaca loona gudbiyo Komishanka si loo diiwaangaliyo (Meeting minutes).
4. Xubnaha Guddidu waa inay dhawraan wakhtiyada shirarka.
5. Shirarku waxay ku qabsomaayaan kooram, go'aanadooduna waxay ku ansaxayaan aqlabiyad.
6. Shirarku waxay ka dhacayaan Xarunta Komishanka. Haddiise baahi lagama maarmaan ahi timaado in meel kale lagu qabto Guddida ayaa go'aaminaysa iyada oo la tashanaysa KDQ, iyadoon waxba loo dhimayn hawlaha shaqo ee Guddidu u xilsaarantahay.



Qodobka 18^{aad}

Wadashaqeynta Komishanka iyo Guddida

1. Guddidu wey u madax baanaantahay awoodaheeda shaqo, ee ku xusan xeerkan habadhaqan, iyagoo marwalba latashi la yeelanaya KDQ.
2. Warbixin kasta oo ay Guddidu soo saarto oo la xidhiidha hawlaheeda shaqo waxay si joogto ah ugu wargelinaysaa Komishanka si loo fuliyo.

Qodobka 19^{aad}

Wadashaqeynta Guddida, Xisbiyada, Ururrada iyo Musharaxiinta

Xisbiyadda Qaranka, Ururrada Siyaasadda iyo Musharaxiintoodu waa in ay la shaqeeyaan, gacanna ka siiyaan hawlaha shaqo ee ay u xilsaarantahay **Guddida Ilaalinta Xeerka Habdhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda** si loo helo doorasho xor iyo xalaal ah.

Qodobka 20^{aad}

Reebanaan

Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa u madaxbanaan maamulidda iyo ka garsooridda arrimaha doorashooyinka. Sidaa daraadeed, waxaa ka reeban Guddida in ay qabato hawlo ka baxsan hawlaha shaqo ee Guddidu u xilsaarantahay.

Qodobka 21^{aad}

Luminta iyo buuxinta Xubinimada Guddida

Xubinta Guddidu wuxuu luminayaa/luminaysaa xubinimada; -


- b) haddii uu jabiyo/jabiso mid ka mid ah iyo in ka badan shuruudihii lagu soo xulay.
- t) haddii xilka u gudan kari waayo/waydo karti darro, ama caafimaad darro awgeed.
- j) haddii ay ku timaado geeri
- x) haddii Xubintu is casisho.

waxa buuxinta xubintaas loo raacayaa habka xubinta Guddida baneeyay Guddida ku yimid.

Qodobka 22^{aad}

Mudada hawlgalka Guddida

Guddidu waxay hawsheeda bilaabaysaa isla marka Komishanku dhammays tiro magacaabisteeda, waxaanay ku egtahay **shan iyo toban (15) cisho** ka dib marka uu Komishanku ku dhawaaqo natiijada Ku-meel-gaadhka ah ee doorashooyinka.



QAYBTA AFRAAD

Qodobka 23^{aad}

Fasiraada Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan xeerarka doorashooyinka, xeerka saxaafadda iyo xeerarka kale ee dalka u yaala. Xeerkan looma fasiran karo si kooban si loo waxyeleeyo balanqaadkiisa, oo ah in la ixtiraamo xuquuqda shakhsiyaadka, isla markaana aan loo tafiirin si balaadhan si ay faragelin aan loo baahnayn ugu noqoto xoriyadda rayiga ama ay ka hortagto dabecadda danta caamka ah.

Qodobka 24^{aad}

Tallaabooyinka Laga Qaadayo Cidda Xeerka Hab-dhaqanka Iyo Anshaxa Jebisa/Ku xadgudubta.

Warbaahinta qaybaheeda kala duduwan ha ahaadeen kuwo dawli ah ama madaxbaanaan ee ku xadgudubta mid ka mid ah ama in kabadan qodobada ku xusan xeerkan hab-dhaqan; -

1. Waxaa talaabo ka qaadaya Guddida Ilaalinta Xeerka Hab-dhaqanka iyo Anshaxa Saxaafadda. Haddii ay arintu tahay mid aanay waxba ka qaban karaynin guddidaasi, Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa guddidu u soo gudbinaya si ay uga go'aan gaadhaan.
2. Haddii danbiyadda dhacay ay noqdaan kuwo ka culus awoodda Komishanka Doorashooyinka Qaranka ama xad-gudubyada dhacay ay yihiin kuwo dambi ciqaabeed ka dhalan karo, waxaa Komishanka Doorashooyinku u gudbinayaa Hay'addaha ay khusayso arrintaasi.
3. Haddii saxeexayaasha xeerku ku xadgudbaan mid ama in ka badan qodobada Xeerkan hab-dhaqan, talaabo ka qaadidooda waxa loo raacayaa xeerarka dalka u yaala.

Qodobka 25^{aad}

Wax-ka-bedel

Xeerkan hab-dhaqan waxaa wax ka bedel iyo kaabis ku samaynta karaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL marka uu la tashado dancayyaasha xeerkan.

Qodobka 26^{aad}

Dhaqangalka

Xeerkani wuxuu dhaqan-galayaa marka dhamaan dhinacyada uu udhaxeeyaa ay wada saxeexaan, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.


Qodobka 27^{aad}

Awoodda Saxeexa


Xeerkan Hab-dhaqan waxaa wada saxeexay Ururrada Warbaahinta, Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigelinta iyo KDQ.

Waxaa lagu saxeexay Hargeysa, maanta oo ay taariikhdu tahay **October 27, 2024.**

WASAARADDA WARFAAFINTA, DHAQANKA, IYO WACYIGELINTA


Mudane Ali Maxamed Xassan

Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka, iyo Wacyigelinta



URURKA SAXAFIYIINTA EE SOLJA


Mudane Shaafici Maxamed Ibraahim

Guddoomiyaha SOLJA




URURKA SAXAFIYIINTA EE WIJA


Marwo Yaasmiin Axmed Yuusuf

Guddoomiyaha WIJA



KOMISHANKA DOORASHOYINKA QARANKA JSL


Mudane Musa Hassan Yousuf

Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL.



